# Barmaamijka Bandhigga Sannadka 2015

*Bandhigga Caalamiga ah ee Buugaagta Hargeysa*

## 8th Hargeysa International Book Fair

1st - 6th August

Guuleed Hotel



Redsea Cultural Foundation








PONTE INVISIBILE

www.redsea-online.com/dhaxalreeb
e: dhaxalreeb@redsea-online.com

# Barmaamijka sannadka



## SABTI 1 OGOOSTO

### 08.30-9.30 – Furitaanka Kulanka

*Mas'uuliyiinta, Kalmadda soo dhawaynta iyo furitaanka kulanka ee: Edna Aadan Ismaaciil. Salaanta iyo Kalmadda Wasiirka Warfaafinta, Wacyi-gelinta iyo Dhaqanka.*




### 9.30.00-10.30 – Dood ku saabsan halku dhegga sannadka oo ah (Spaces) "barada"

Kulankan, ka qayb-galayaashu waxay ka doodayaan halku-dhegga dabbaaldegga sannadka iyaga oo ka eegaya dhinacyo kala duwan oo ay ka mid tahay aqoonta iyo khibradda ay shakhsiyan u leeyihiin halku dhiga.
Edna Aadan, waa hoggaamiye furfuran, u dooddida arrimaha bulshada ku kasbatay abaalmarinno badan, Edna waxay nafteeda u hurtay inay aasaasto isla markaana taageerto







dhakhtarka lagu daryeelo dumarka iyo carruurta. Edna waxay soo bandhigaysaa halku-dhegga, sannadka iyada oo ka eegaysa khibradeeda shaqaale caafimaad ahaan iyo u ololeeye xuquuqda aadamaha. Edna waxaa hadalka la wadaagi doona Sheekh Maxamuud Sh. A. Dalmar (Aqoonyahan) iyo Aamina-Milgo Maxamuud (U doode Xuquuqda Aadamaha) iyo ugu danbayntii Hoodo-Ayaan Suldaan and Maxamed Cumar oo ka fal-celinaya micnaha haiku-dhegga sannadku u leeyahay dhallinyarada Somaliland.



Xidhiidhiye: **Quman Akli**

## 10.30-11.00 - Bandhigga Buugaagta, libsashada iyo jeedaalinta buugaagta diyaarka –





## 12.00-1300 – Bandhig shaxan

Booqashada badhigyada shaxannada kala duwan sida;– Hargeysa waa goob xabaala iyo Ubaxii Hargeysa oo ay diyaarisey Alison Barkerville (UK), “Sawirka qofka” Samira Al Baroud, Bandhiga Sawiradda ee UNICEF ee Kate Holt (UK-Kenya), Kate Stanworth (UK) iyo Bandhigga Buugaagta Caalmiga ah ee Hargeysa, Farshaxanka iyo sawiradda (Bahja M Duale iyo Nagib Arab Ibrahim, Somaliland)

Xidhiidhiye:
**Mustafe Siciid**



















## 16.00-17.00 - Xarunta Dhaqanka Hargeysa: 1 sanno ka dib – Daawashada iyo daah-furka Qolqolka Shaxanka

In ka yar sannad, Xarunta Dhaqanka Hargeysa waxay isku diyaarisay inay noqoto hal-bawle muhiim u ah garaadka iyo dhaqanka Somaliland. Shaqaalaha Xaruntu waxay ku faraxsanyihiin inay idiin soo bandhigaan hawl-qabadyadda qorshaysan ee sannadka soo socda iyo daah-furka nashqadaha cusub ee qolqolka shaxanka.

Xidhiidhiye: **Shaqaalaha Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa**






## 17.00-18.00 – Wada sheekaysi "Qoraaladii hore ee Islaamku" siday ku soo gaadheen Somaliland

Sida gobollada kale ee ka hooseeya saxaraha Afrika, Geeska Afrika wuxuu qani ku yahay qoraalo qadiimi ah oo ay soo saareen dadyow iyo bulshooyinka kala duwan oo ku nool gobolka. Qoraaladdani waxay is bar bar dhigayaan suugaanta aan qornayn ee soo bandhigaysa xiisaha dhaqanka Geeska Afrika. Kulankan waxaa diirada lagu saarayaa xaaladda dalka Somaliland waxaana la soo bandhigayaa cilmi-baadhis socota oo ku saabsan mawduuca.

Waxaa ka qayb qaadanaya Alessandro Gori (Jaamacadda Copenhagen), Dr. Michele Petrone (Jaamacadda Florence) iyo Jama Musse Jama (Xarunta Dhaqanka Hargeysa).

Gudoomiye: **Ahmed I Awale**







## 19.30-20.30 - Bandhiga Buuga

“Geeljire iyo Aqoonjire”, ee Maxamuud Axmed Cali, 1903-1983. Waxaa turjumay oo tafatir Maxamed Axmed Caynaanshe. Maxamuud Axmed Cali waa aabihii waxbarashada ee dhulka Soomaalida. Buugani wuxuu ku saabsanyahay taariikhdii Maxamuud oo ku qoran luuqadda Carabiga waxaana qoray Ibraahim Mahamoud Ahmed iyo turjumadii iyo tafaftirkiii Maxamed Axmed Caynaanshe. Buugga waxaa soo bandhigi doona Maxamed Jaamac Kayd (Abwaan), Safiir Yuusuf Gaydh (Ardaygii hore ee Maxamuud Axmed Cali), iyo aqoonyahan Rashiid Sheekh Cabdillaahi iyo Siciid Jaamac Xuseen.

Gudoomiye: **Cabdishakuur Xaaji Muxumed Muuse (Heersare).**






## 20.30-21.30 – Riwaayad aamusan waxaa qoray soona agaasimay Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan

## AXAD, 2 OGOOST

### 08.30-9.30 - La kulan qoraaga:

La sheekaysiga Professor Osundaro. Niyi Osundare, gabyaa Nigerian caanka ah, curinta riwaayadaha iyo falanqaynta suugaanta wuxuu inoo akhriyi doonaa qayb ka mid gabayadiisa cusub.





Gudoomiye: **Sihaam Riyaale**



### 9.30-10.30 – Wada sheekaysiga Edna Aadan iyo Jude Kelly, Agaasimaha Farshaxanka ee Xarunta Southbank Centre, iyo Aas aasaha WOW - Women of the World.




Dad kooban ayaa wadaaga rajo wadareeed, kartida iyo doonida qaranimo sida Edna Aadan, oo ah kal-kaaliso tababaran, Masuul sare oo ka tirsan Ururka Caafimaadka Adduunka, gabadhii ugu horaysay ee noqota Wasiirkii Arrimaha Dibadda Somaliland, waxay si firfircoon ugu doodaa xuquuqda dumarka. Ka dib markii ay heer sare ka gaadhay shaqadii Ururka Caafimaadka Adduunka, Edna waxay ku maal galisay aqoonteeda iyo hantideedii gaarka ahayd Dhakhtar Dumarka iyo Caruurta ee Edna Aadan, si ay hoos ugu dhigto tiradda aadka u saraysa ee caruurta iyo dumarka ku dhinta wakhtiga umusha Somaliland oo si fudud looga hor tagi karo. Naga la soo qaybgal si aad u fahanto waxa dhiirigeliyey Edna inay bilowdo hawlgalka biniaadannimo si ay u dhisto dhakhtarkii ugu horeeyey ee hooyada iyo dhalaanka ee Somaliland iyo inay tababartay ilaa 1,000 umuliso.





## 10.30-11.30 – "Aan ka hadalno siyaasadda"

Haweenku waxay ka ciyaarayeen door muhiim ah horumarinta nidaamka dimuqraadiyadda, aminiga, kala danbaynta iyo nabad dhisida Somaliland. Inkastoo sanadihii la soo dhaafay tirada guud ee haweenka ku jira siyaasadda Somliland aanay u badanin sidii la doonayay tiradooduna yartahay marka la bar bar dhigo tirada ragga ku jira heerarka kala duwan ee hay'adaha go'aanadda siyaasadeedyada lagu gaadho. Kulankan, waxa lagu baadhayaa sababaha ka keenay in haweenku ay ku yaraadaan siyaasada ama ka qayb qaadashadeeda, in kastoo codbixiyayaasha ugu badani doorashooyinka dalku ay haweenka yihiin. Waa maxay caqabadaha nidaam ee ka hor jooga haweenka inay tartamaan ama ka qayb galaan doorashooyinka? Sawir intee leeg ayey bixiysaa fikaradaha khaldan ee ku aadan ka qaybgalka haweenka ee siyaasaddu ama door intee leeg ayey sawiradani ku leeyihiin guulaha siyaasadeed ee dumarka? Dib u habayn bulsho, shirci iyo maamul intee leeg ayaa loo baahan yahay si loogu sinaado tartanka siyaasiga ah iyo taageerista sidii ay haweenku uga qayb qaadan lahaayeen siyaasadda?










Ku soo biir wada hadalka Wariyaha iyo Curiyaha Ingiriiska ah ee asal ahaan ka soo jeeda Eritrea Hannah Pool iyo martida kale sida;

Marwo Shukri Ismaaciil Bandare, Wasiirka Deegaanka, Marwo, Samsam Cabdi Aadan, Wasiirka Maaliyadda, iyo Aamina Milgo Warsame, Cilmi-baadhe sare: Intabu waxay dadwaynaha la wadaagayaan waayo aragnimadooda, khibradooda sare iyo guulaha siyaasadeed iyo sida albaabo kale loogu furi karo haweenka iyo sidii loogu dhiirigalin lahaa inay ka qayb galaan siyaasadda dalka.

## 11.30-12.30 - Bandhiga Buugga:

"Mahado: Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye". Mahadho –waa buug ka hadlaya taariikh nololeedkii, safarkii iyo hawl-qabadyadii suugaaneed ee "Gaarriye" (AHN) waxaa tafatiray Cabdiraxmaan C. F "Barwaaqo" oo ka tirsan Dugsiga Luuqadaha ee Gaariye, Jamaacadda Hargeysa.






Gudoomiye: **Maxamed Xirsi Guuleed**

## 16.00-17.00 - Buugaag cusub

Sayid Axmed iyo Cabdillaahi Cawed Cige waxay soo bandhigi doonaan buugaag cusub oo lagu daabacay Somaliland iyo meelo kale. Ka eeg liistada iyo ciwaanadda buugaagta Boodhka Ogaysiiska.

Xidhiidhiye: **Sayid Axmed M Yuusuf iyo Cabdillaahi Cawed Cige.**







## 17.00-17.30 – Falcelinta:

Siciid Jaamac Xuseen “Nuxurka halku dhiga sanaddka ee HIBF, kala xulashada halku dhegyada iyo xidhiidhka ka dhexeeya” Wuxuu soo bandhigayaa ujeedooyinka iyo guulaha Carwada Buugaagta Caalamiga ah ee Hargeysa. Waa maxay nuxurka bandhiga buugaagtu? Sidee loo doortaa halku dhigyada sanad kasta? Maxay ahaayeen fariimaha ay gudbinayeen halku dhigyadaasi iyo xidhiidhka ay lahaayeen.

Siciid Jaamac waa qoraaga dhawr buug oo ay ka mid yihiin Shufbeel iyo Safar aan jiho lahayn. Siciid wuxuu turjumay qoraallada Anthon Chekhov, wuxuuna laf dhabar u ahaa isku keenista ciwaanadii Soomalidii hore iyo dadka ku hadla af Soomaaliga.

Xidhiidhiye: **Maxamed Xirsi Guuleed. Waxa ku weheliya Siciid Saalax Axmed.**





## 17.30-18.00–Falcelinta:

Rashiid Sheekh Cabdillaahi “Gadhwayne” “(Spaces) Meel banaan maxaa loogu doortay halku dhiga sanaddkan?” Rashiid ‘Gadhweyne’ waa aqoon yahan sare, khabiir arrimaha bulshada iyo suugaan yahan, waa Gudoomiyaha Gudida baadhaysa danbiyadii dagaalka, Hargeysa, Somaliland. Buugaagtii uu qoray waxaa ugu danbeeyey ee ay daabacdo Redsea waxaa ka mid ah, Curisyo loogu magac daray Aduun iyo Taladii, wuxuuna hore inoogu sharaxay halku dhigyadii Xornimadda, Dul-qaadka, Toosanaanta, Sinaanta, iyo Asalnimadooda, akhlaaqda iyo sababaynta anshaxa guud si waafaqsan Soomaalida. Wuxuu sidoo kale dhawaan tafatiray curisyada “Colaad iyo Nabad oo ku saabsan aqoonta suugaanta Soomaaliyeed.”

Xidhiidhiye: **Cabdillaahi Cawed Cige**

## 19.30 - 21.00: Horta! Somaliland yaa iska leh?

Dagaal, nabadda, barakaca, soo noqoshada barakacayaasha, burburka hantida iyo soo kabasahda; taariikhda cusub ee Somaliland waxaa ka buuxa marxalado kala duwan. Sidaa darteed, falcelinno kooban ayaa laga bixiyey taariikhdii qaska badnayd ee la soo maray taas oo saamayn ku yeelatay nolosha haweenka Somaliland. Waayo aragnimadooda, naf-huritaankooda iyo sheekooyinka kale oo aan la ilaawi karin.

Waxaan waraysanay sida dhalashada dal dimuqraadiya oo cusub ay wax uga bedeshay nolosha haweenka. Miyay jiraan balanqaadyo aan la fulinin? Maxay ka dhigantahay inaad noqoto qof dumara ama inan ku nool Somaliland wakhtigan?

Waxaa nala wadaagi doona, Dr. Siham Riyaale, Faduma Bihi, oo u dooda xuquuqda dadka naafada ah. Faadumo waxay ku wayday lugaheeda ka dib markii ay miino ku dul joogsatay, Hibo Salah, oo ah gabadhii ugu horeysay ee Ciidanka Booliska Somaliland ka noqotay Gaashaanle iyo ka qayb galayaal kale oo inala wadaagi doona khibradda ay u leeyihiin haweenka Somaaliland ee ku dhex nool bulshadeena.

Gudoomiye: **Sahra Jibriil**







## 21.00-21.30 – WOW- Hargeysa:

Akhris iyo bandhig: Sahra Ilays, Sahra Halgan.

## 8:30-9:30 - Wada hadalka iyo ka sheekaysiga facyaal kala duwan: U diyaarinta goobo mustaqbal iyo hogaamineed ee faca cusub ee hablaha

Hibo Jamaal waxay waraysan doontaa Nadiifo Maxamed, qoraaga caanka ah ee reer Ingiriis iyo dhalinyaro u dhalatay Somaliland, Muna Axmed Cumar, qoraa dhalinyaro ah, Xaawo Jaamac Cabdi, gabadh abwaanad dhalinyaro ah oo u doodda dadka naafada ah, Hawo waxay ku dhalatay iyada oo idho-la' iyo Yasmin M. Kaahin abwaan iyo qoraa riwaayadeed. Dhamaantood waxay sharaxayaan caqabadaha soo wajaha faca dumarka wax qora. Iyo muhiimadda ay leedahay in maamulidda qoraalka qof iyo dadka ku dayashada mudan ee ay raacaan si ay u saamayn ugu yeeshaan jiilal cusub oo hogaamiyayaal ah.



## 09.30-10.00 – 09.30-10.00 – Khudbadda Marwada Koowaad Somaliland Marwo Amina Maxamuud Jirde



Aamina Mahamed Jirde, Marwada koowaad ee Somaliland waxay cod dheer uga hadashaa arrimaha dumarka Somaliland. Waxay wax ku baratay Dugsiga Hablaha ee Burco ka hor intii aanay u guurin London halkaas oo ay ku dhamaysay waxbarashadeedii sare kana shaqaysay dhawr hay'adood oo kala duwan. Shaqadii ugu caansanayd oo ahayd inay noqotay Madax ku xigeenka Golaha Qaxootiga Ingiriiska.

Gudoomiye: **Marwo Raaqiya Xaaji Ducaale**

## 10.00-10.30 – Kalmada xidhitaanka waxaa jeedinaya Jude Kelly, Agaaasimaha Farshaxanka ee Xarunta Southbank ee London ahna Asaasaha dhaqdhaaqa WOW - Women of the World festival movement



Jude Kelly waxa loo magacaabay Agaasimaha Farshaxanka ee Xarunta Southbank sannadkii 2006. Xaruntu waa Hay'adda dhaqan ee ugu wayn dalka Ingiriiska Waxay asaastay masraxa dadka Solent iyo Xarunta farshaxanka ee Bettersea, waxayna ahayd agaasimihii bilaabay Mashraxa galbeed eee Yorshire. Sanadkii

1997 waxa la siiyay abaalgudka CBE ee la siiyo dadka ka shaqeeya farshaxanka oo la bixiyo sanaddka cusub. Waxay agaasmintay in ka badan 100 barnaamij oo ka tirsan Shirkadda Royal Shakespeare ee Châtalet Paris Jude waxay xubin ka tahay Kooxda Istraatejiyadda Dhaqanka ee London. Waxay sidoo kale qayb ka tahay Culture Olympiad oo ka masuul ah nidaam socda oo lagu gudbinayo waxbarashada dhaqanka si fudud loo baranayo ee London oo loo yaqaano tartarnka Olympic iyo Paralympic sanadkii 2012ka. Jude waxay asaastay WOW Dabaal dega Haweenka Aduunka sanadkii 2011. Iminkana waxay ku jiraan sanadkii 5aad ee ay ku dhex shaqeeyaan xarunta Southbank. Dhaqdhaqaaqu wuxuu u koray inuu noqdo dabaaldeg laga xuso 15 dal oo aduunka ah.

## 10.30 – 10.15 Nasasho Kooban





## 10.15 – 11.30 Akhriska Gabayada: Phyllis Muthoni iyo Mpalive Msiska

Guddoomiye: **Barkhad M. Kaariye**




## 11.30- 12.30 – Kulanka : Dalka inoo martida ah – Nayjeeriya

Nayjeeriya waa dalka si buuxda u waafaqay halkudhegga dabaaldegga sannadkan. Dalku wuxuu leeyahay in ka badan 500 oo qoomiyadood iyo luuqadood. Nayjeeriya waxay hoy u tahay hal qof oo ka mid ah afartii qof ee Afrikan ah iyo sidoo kale hal qoomiyad oo ka mid ah afartii qoomiyadood ee Afrikan ah. Dalku wuxuu leeyahay taariikh dhaqan oo aduunkoo dhan laga yaqaan oo ka soo bilaabmaysa qarnigii 5aad dhalashadii Nabi Ciise (CS) hortii iyo ilaa wakhtigii Nok, Ife, Oyo, Benin, Bornu iyo Igbo Ukwu iyo kuwo kale oo badan. Nayjeeriya waxay hoy u tahay hal-abuurnimo ka muuqata farshaxamiistayaasha, muusikada, aflaamta, iyo suugaanta reer Nayjeeriya oo aan Afrika kaliya ku koobnaynee aduunkoo dhan laga yaqaano. Sidoo kale waxaa dalkan haysta caqabado kala duwan oo soo wajaha dalka firfircoon.






Martida inooga socota dalka Nayjeeriya waxay inala wadaagi doonaan aragtidooda aqoonyahanimo, hal-abuurnimo sida dalkoodu u leeyahay goobo banaan oo ka jawaaaba himilooyinka arrimaha siyaasadeed, dhaqan iyo bulsho ee dalka ugu wayn Afrika.

Gudoomiye: **Rashid Garuf**

## 15.00 – 15.30



Kulankan waxaa diirada lagu saaryaa buugaagta ay daabaceen naadiyada akhriska ee Goboladda iyaga oo wada akhriyi doona

Gudoomiye: **Xidhiidhiye: Cadnaan Saleebaan Hagoog**




## 16.00-17.00 – Noloshii, Gabayadii iyo Mahadhooyinkii Cilmi Boodhari



Kulankan waxaa lagu falanqayn doonaa sida suugaanta afka iyo qoraalka Soomaaliyeed u qeexaan jacaylka iyo sida ay uga dheehdaan mahadhooyinkii Cilmi Boodhari. Rashiid Maxamed Shabeelle qoraaga buuga"Ma dhabbaa jacalayl waa loo dhintaa" [Is it true people die of love], 1975, daabacaadda labaad 2015), Maxamed Xirsi Guuleed "qoraaga buugga Cilmi Boodhari iyo Caashaqiisii" [Cilmi Boodhari and his love] iyo Idris Yuusuf Cilmi oo turjumay buuga "Cilmi Boodheri: L'histoire d'un amour absolu" [the story of absolute love] ee uu qoray Cabdirashiid Ismaaciil Maxamed).

Hage: **Maxamuud Cabdi Cali Ducaale**










## 17.00-18.00 – La kulana qoraaga:Wada-sheekaysiga Hannah Pool.

Qoraa iyo suxufi Ingiriisa oo Eritrea u dhashay, Hannah waxay qortay buuga “Inantii Aabahay” (My Fathers' Daughter) waxay kala sheekaysan doontaa Quman Akli buugeeda.








Guddoomiye: **Quman Akli**

## 19.30-20.30 – La kulan qoraaga: Wada-sheekaysiga Okey Mdibe.

Qoraa, Maqaaladda siyaasadeed, iyo qoraallo gaa-gaaban., Okey Mdibe waa qoraaga buuga Arrows of Rain iyo kuwo kale oo badan. Okey wuxuu kala sheekaysan doonaa Maimouna Jallow qoraaladiisa cusub











Guddoomiye: **Maimouna Jallow**

## 20.30-21.30 – La kulanka qoraaga: Faarax Gaamuute oo uu ina bari doono Rashiid Sh. Cabdillaahi.

Faarax waa qoraa, abwaan iyo aqoonyahan ku nool dalka Canada kaas oo sanado badan ku qaatay cilmi-baadhis ku saabsan qaab-dhismeedka suugaanta Soomaaliyeed. Kaas oo uu ku soo qaatay buugiisii ugu danbeeyey ee la daabaco oo la yidhaahdo “Coming of age: an Introduction to Somali Metrics” oo ay daabacday Redsea. Farah Gamuute wuxuu hada la shaqeeyaa Seeska Hidaha iyo Dhaqanka ee Redsea isaga oo cilmi-baadhis ku samaynaya taxanaha suugaanta Abwaan Maxamed Ibrahim Warsame “Hadraawi”





Guddoomiye: **Cumar Cali Xasan “Serbia”**

## SALAASA, 4 OGOOST

### 08.30-09.15 – La kulanka qoraaga: Wad-sheekaysiga Jonny Steinberg



Jonny waa qoraa iyo aqoonyahan reer Koonfur Afrika ah waana Kaaliye Professor cilmiyga baadhista danbiyada Criminology ee Jaamacadda Oxford University. Wuxuu soo bandhigi doonaa buugii ugu danbeeyey ee uu qoray , A Man of Good Hope, wuxuu la sheekaysan doonaa Sahra Axmed, dareen celintii ka dib markii uuu daabacay sheeko dareen xanbaarsan.

Gudoomiye: **Zahra Ahmed**

### 09.15-10.00 – La kulanka Qoraaga: Wada-sheekaysiga Michaela Maria.


Michaela waxay ku dhalatay  Dachau, Germany sanadkii 1974 halkaaso oo ay ku barbaartay qoys Xoolo-beero dhaqato ah. Waxay noqotay qofka ugu buugaagta fiican New York iyo Munich. Waxay baratay Taariikhda iyo Siyaasadda Jaamacadda Humboldt University ee Berlin. Ilaa iyo 2006dii waxay ku shaqaynaysay suxufinimo wargeys Jarmal ah oo la yidhaahdo (SueddeutscheZeitung. Frankfurter All gemeine Zeitung). Buugeeda sheekada ugu horeeyey waxa la yidhaahdaa“Amaal iyo Sameer” waa sheeko lamaane Soomaaliyeed oo is qaba. Waxay u sharaxi doontaa Hannah Pool buugeeda cusub

Guddoomiye: **Hannah Pool**

### 10.00-10.45 - La kulan qoraaga: Chuma Nkolowo

Kulantan waxaa si balaadhan loogu soo bandhigi doonaa qoraalada badan ee Chuma Nkolowo (Memories of Stone, The Ghost of Sani Abacha) iyo qareenkii habsanka ahaa. CikuKimeria ayaa waydiin doona qoraaladda uu soo wado.





Guddoomiye: **Ciku Kimeria**

### 11.00-12.30

Hal abuur iyo halkudhegga sannadka “fogaalka qoraaga” - Akhriska Abwaaan iyo Qoraa riwaayadeed Siciid Salah Ahmed. Macallin Siciid Saalax wuxuu inoo akhriyi doonaa curisyo ka mid ah sheekooyin gaagaaban oo uu soo wado. Waxana uu diiradda saari doonaa halkudhegga sannadka.






Guddoomiye - **Barkhad M Kaariye**

### 15.00-15.45 Kulanka Naadiyadda Akhriska

Hage: **Naadiga Akhriska ee Berbera oo ka sheekeeya sidii ay u dhiseen Rugta Kutubta.**

## 16.00 – 17.00 La kulan qoraaga. Ciku Kimeria.








Qoraaga labaad eebuuga "Of goats and poisoned oranges: more surprises than Thika road" iyada oo raacin doonta sharaxaad ku saabsan qoraaladeeda.

Guddoomiye: **Nimo Jirdeh**

## 17.00-17.40 - La kulan qoraaga: Wada-sheekaysiga Maimouna Jallow:





Waxay ururisaa sheekooyin; qoraaa, abwaanka Ancient Tales of East Africa Maimouna Jallow waxay la hadli doonta Wariyaha BBC ee Mary Harper waxayna u sharaxi doontaa sheekooyinka iyo muhiimadda ay leedahay in la ilaaliyo dhaqanka iyo soo jireenka sheekooyinka Afka la iskugu gudbiyo.
Guddoomiye: **Mary Harper**

## 17.40-18.10 – La kulan halabuurka: Wada-sheekasiga Benjamin Dix.

Benjamin Dix waa Xirfadle Sawirqaade ah, u taagan inuu qaato shahaadada PhD ee cilmiga Barashada Dadka iyo BulshooyinkaWuxuu qoray ururiyay "Meet the Somali" oo taxani 14 sheeko oo run ah oo ku saabsan waayo aragnimada Soomaalida ku nool todoba magaalo oo ku yaal Yurub. Wuxuu inala wadaagi doonaa daabacadihiisa hore iyo kuwa uu soo wado.
Guddoomiye: **Hannah Pool**

## 17.40-18.10 – Dumarka Soomaaliyeed iyo nabadda. Baadhitaan ay samaysay Dr. Sihaam Rayaale oo hirgelisay (Oxfam).



## 19.30-20.30 - Xasan Xaaji Cabdillaahi "Ganey".





Baro Xasan Ganey riwaayadihiisa, heesihiisa, gabayadiisa iyo taxanaha suugaantiisaa ee aan la malayn Karin. Wuxuu uu wax inooga akhriyi doonaa buugiisa cusub ee "Bad Macaan" ee uu tafatiray Cabdiraxmaan C. F Barwaaqo. Guddoomiye: **Cabdiraxmaan C. F. "Barwaaqo".**

## 20.30-21.30

Ururada Bulshada Rayidka ah ee Somaliland ayaa waxay ku marti-qaadayaan martida Bandhiga Buugaagta Caalamiga ah ee Hargeysa casho sharaf.

Xidhiidhiye: **SONSAF**

# ARBACA 5 OGOOST

## 08.30-09.30




Joe Addo waa muhindis caan ka ah waddankiisa Gaana ee Galbeedka Afrika. Wuxuu ka shaqeeyey dalalka Finland, UK iyo USA intaannu kusoo noqon. Los Angels 1991kii. Joe wuxuu ku noqday waddankiisii Gana oo ka furay xarun cilmi baadhiseed 2004.

Halkan waxa uu kala sheekaysan doonaa dhagaystayaasha Afrika, Barada iyo sida uu "Archicet" isu waafajiyo oo u degaameeyo cilmiga dhismaha.

## 09.30-10.30 Buuga Chinua Achebe ee la magac baxay "Things fall apart"



Waxaan isku keeni doonaa aqoonyahanka, Professor NiyiOsundare (Jaamacadda New Orleans ee Maraykanka), Dr Mpalive-Hangson Msiska (Jaamacadda Birkbeck, ee London) and Chuma Nkolowo (Abwaan, qoraa iyo tafaftiraha majaladda Qoraalka Afrika), Kulanka waxaa lagu faaqidi doonaa buug yaraha "Things Fall Apart" (1958) ee uu qoray qoraaga caanka ah ee reer Nigeria Chinua Achebe, iyo muhiimadiisa taariikh ahaaneed iyo siyaasad ahaaneed

Ka qayb galayaasha: **Mpalive, Osundaro, Chuma**.
Guddoomiye : **Donia Jama**l

## 10.30-11.30 – Ururka Qorayaasha Somaliland ee Sweden iyo Somaliland.




Sayid Axmed waa Gudoomiyihii hore ee Ururka ayaa wuxuu ka kulmi doonaa xubno ka tirsan ururka. Hawl-qabadyadii ugu danbeeyey ee Sayid Ahmed ayaa la soo bandhigi doonaa.

Guddoomiye : **Axmed Ibraahim Awale**

## 11.30-12.30 - Bandhiga Buugaagta:



eeg taxanaha buugaagta cusub ee ku dhegsan tusaha ogaysiiska




## 16.00-17.00 - Kulanka: Sooyaal fanka iyo suugaanta qaraamka






HIBF waxay habeenkaa dhan u hibaynaysaa abwaannada, hooballada iyo musileyda iyo jilayaasha caanka ah oo qayb ka ah dabaaldega sanad kasta. Sannadkan kulan gaar ah ayaa loo samayn doonaa wayo aragga fanka sida Jaamac Saleebaan Tubeec, Xasan Xaaji Cabdillaahi "Ganey", Axmed Saleebaan Bidde, Rashid Bullo

Guddoomiye : **Maxamuud Cabdi Cali "Ducaale"**

## 17.00-18.00 xafladda Djibouti:




Dabaaldega farshaxanka iyo dhaqanka Djibouti waxaa inoo daadahaynaya qoraaga reer Djibouti ee Cabdalle Xaaji: "Qalin ma koobaan", Buugga suugaanta Cali Mooge.

Cabdikariim Siciid: "Dhab-kahadal"

Guddoomiye : **Maxamed Xirsi Guuleed**.

## 19.30-20.30
## Natiijada tartanka Sheeko iyo Shaahid Cabdillaahi Cawed Cige



## 20.30-21.30 Bandhigga Ciyaarta Sitaadka

# KHAMIIS 6 OGOOST

## 08.30-10.00

Naadiyada Akhrika ee Berbera, Burco, Borama, Cerigaabo, Hargeysa, Laascaanood, Sheekh, Gebiley, Oodweyne waxay soo bandhigi doonaan faa'iidooyinka ay leedahay in la sameeyo rugo wax akhris iyo doorka ay ku leeyihiin naadiyada akhrisku horumarinta dhaqanka qoraalka iyo akhriska.





## 10.00-11.00 Buugaagta ay daabaceen Naadiyada Akhrisku

## 11.00-12.00 Dood ku saabsani curinta aqoonta:

Dr. Sihaam Riyaale, Nimco Cali iyo Yuusuf Serunkuma waxa ay eegi doonnaa sida loo abuuro aqoonta iyo sida ay had iyo jeer ugu jirto gacanta dawladaha ay dhaqaalohoodu sarreeyo.

## 12.00-13.00
## Shax Game - Final







## 16.00-17.00

BCBH - U sheekaynta Caruurta ee Carwada Buugaagta Caalamiga ah ee Hargeysa
Hoodo Ayaan, Farduus M Dheere, Cabdi Falaash iyo Axmed





## 17.00-18.00
## Circus Somaliland




## 19.30-20.30

Xafladda Gabagabada – Riwaayad cusub oo ku saabsan “Xaalka bulsho iyo siyaasadeed ee Somaliland”, Riwaayadda “Bulsho toosan, ma taftaafo dhanxiirku”, waxaa qoray Saleebaan Carab Aw Siciid, waxaana agaasimay Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan.



## 20.30-22.00



Gabagabo – Madadaallo - Martida: Daa’ud Ali Masaxaf, Maxamed BK iyoSahra Ilays

redsea-online.com
cultural foundation

## Partners & Supporters

Kayd.org
Somali Art & Youth Entertainment

Rift Valley Institute
Taasisi ya Bonde Kuu
Machadka Dooxada Rift
Instituto do Vale do Rift
Institut de la Vallée du Rift

EUROPEAN UNION

Prince Claus Fund for Culture and Development

FOREIGN & COMMONWEALTH OFFICE FCO

OXFAM
A JUST WORLD WITHOUT POVERTY.

MILES MORLAND

Dahabshiil

Save the Children.

NED National Endowment for Democracy
Supporting freedom around the world

The Pharo Foundation

WOW

SOUTHBANK CENTRE

Bloomberg

SOMTEL

DAALLO Airlines


Ambassador Hotel Somaliland


Maansoor Hotel Hargeysa

Gulaid Hotel

REGIONAL READERS CLUBS AND CULTURAL ASSOCIATIONS
APD, SONYO, SOCSA, HAVOYOCO, CANDLEIGHT, NEGAAD, SONSAF, UNUGGA WADDANIYADDA SOMALILAND

PONTE INVISIBILE

design & printed by :: www.hitechprint.co.uk :: 0208 1234 152, 0797 3756 614